

Hagidaada ee ku codeynta Doorashada Guud ee 2020 iyo aftiyada.



ELECTORAL COMMISSION
TE KAITIAKI TAKE KŌWHIRI

E231 08/20 Somali



Faham waxa la filanayo iyo sida loo codeeyo 2020.

Hubi inaad ka diiwaangashantahay iyo sharaxaadahaaga ay cusubiyihiin.

Si aad u codeysid, waxaad u baahantahay inaad diiwaangashanaatid. Waa inaad iska diiwaangelisaa haddii aad tahay 18 sanno jir ama ka weyntahay, muwaadinka New Zealand ama daganaanshaha joogtada, oo aad si joogta ah ugu nooleyd New Zealand 12 bilood ama ka badan waqtiga qaar ee noloshada.



Is diiwaangeli xili hore si aad u dadajisid codeynta oo aad u fududeysid

Haddii aad is diiwaangelisid Axada 13 ka Sebteembar, waxaad ku heleysaa baakida EasyVote boostada qiyaastii 2 isbuuc maalinta doorashada ka hor.

Baakidaada EasyVote ayaa kuu sheegeyso goorta aad codeyn kartid, iyo cida aad u codeyn kartid. Baakidaada waxaa sidoo kale ku jirayo kaarkaaga EasyVote ee la gaareyay, taas oo ka dhigta codeynta mid dhaqsi ah oo fudud.

Waad is diiwaangelin kartaa kadib 13 ka Sebteembar, oo ay ku jiraan maalinta doorashada, laakin ma heleysid kaarkaaga EasyVote. Waxaad sidoo kale u baahanaysaa inaad codeysid codeyn gaar ah taas oo dheeraato.



Is diiwaangeli, sax ama ku cusbooneysi sharaxaadahaaga onleenka

Way sahlantahay in la is diiwaangeliyo, saxdid ama ku cusbooneysiisid sharaxaadahaaga onleenka adiga oo isticmaalayo shatigaaga darawalnimada New Zealand, baasaboorka New Zealand ama aqoonsiga la xaqiijiyay ee RealMe. Booqo [vote.nz](https://www.vote.nz)

Sidoo kale waad iska diiwaangelin kartaa goob walboo codeyn ah laga bilow 3 da Oktoobar ama u weydii foomka diiwaangelinta mid ka mid ah qaababkaan:

- Soo wac **0800 36 76 56**
- Ku dir fariin qoraal bilaash ah magacaaga iyo ciwaanka **3676**.



Codey xili hore

Doorashada Guud ee 2020 iyo aftiyada waxaa hadeer la qabnanayaa Sabtida 17 ka Oktoobar. Codey xili hore si markaas aad ugu isticmaashid waqti yar safka — uma baahnid inaad sugtid illaa maalinta codeynta ee la codeynayo.

Codeynta waxay furmaysaa: 9.00am ee Sabtida 3 da Oktoobar

Codeynta waxay xirantaa: 7.00pm ee maalinta codeynta, Sabtida 17 ka Oktoobar



Ku codey deegaan ahaan haddii aad awoodid

Waa degdeg oo way sahlantahay inaad ka codeysid meel guriga u dhow. Waxaad ka codeyn kartaa meel walboo codeyn ah ee Aotearoa, laakin waxaad u baahan kartaa inaad buuxiso foomka dheeraadka ah haddii aad ku codeysid meel kabaxsan codeeyayaasha.



Markii goobaha codeynta la furo iyo meesha laga helayo

Waad iska diiwaangelin kartaa oo waxaad ka codeyn kartaa doorashada guud iyo aftiyada meel walboo codbixinta ka socoto bilow Sabtida 3 da Oktoobar ee maalinta doorashada, Sabtida 17 ka Oktoobar .

Maalinta doorashada, Sabtida 17 ka Oktoobar, dhammaan meelaha codeynta waxaa la furayaa laga bilaabo 9.00am illaa 7.00pm.

Warbixinta ku saabsan goobaha iyo saacadaha furitaanka ee goobaha codeynta waxaa laga helayaa [vote.nz](https://www.vote.nz) ama adiga oo soo wacayo **0800 36 76 56**.



Waxaad sidoo kale codeyn kartaa labo afti

Doorashada guud ee sannadkaan, waxaad sidoo kale codeyn kartaa labo afti. Aftida waa codeyn su'aal ah.

Waad codeyn kartaa haddii End of Life Choice Act 2019 ay tahay in la fulliyo, oo dadka qabo jirooyinka aan la daaweyn karin la siinayo iqtiyaarka ay ku codsanayaan dhimashada la caawiyay. Sidoo kale waad codeyn kartaa haddii isticmaalka madadaalada xashiishka kula tahay in sharci laga dhigo.

Wax badan uga baro aftiyada [referendums.govt.nz](https://www.referendums.govt.nz)



Meesha laga helo warbixin dheeraad ah ee ku saabsan is diiwaangelinta iyo codeynta:

- Booqo [vote.nz](https://www.vote.nz)
- Soo wac **0800 36 76 56**
- Booqo [facebook.com/voteNZ](https://www.facebook.com/voteNZ)

Haddii aad ogtahay qof warbixintan ay caawineyso, fadlan usheeg warbixintaan.

Warbixinta ku saabsan is diiwaangelinta iyo codeynta sidoo kale waxaa looga heli karaa luuqado kale halkaan [vote.nz](https://www.vote.nz)

Sidda cod bixinta loo samaynayo

1 Qaado qalin iyo kaarkaaga EasyVote

Waxaad la imaan kartaa qalinkaaga gaarka ah si aad u calaameysid waraaqaha codeynta. Haddii aad ilowdid, ha walwalin, waxaa jirayo qalimaan la heli karo.

Horay u qaado kaarkaaga EasyVote sida ay kuu dadajineyso codeyntaada. Weli waad codeyn kartaa haddii aad ilowdid kaarkaaga ama aadan mid haysan.




2 Isticmaal jeermisdilaha gacmaha ee lagu siiyay

Ka hor inta aadan helin waraaqahaaga codeynta, isticmaal jeermisdilaha gacmaha ee lagu siiyay.



3 Raac tilmaamaha

Shaqaalaha doorashada goobtaada codeynta ayaa ku tusiinayo waxa la sameeyo iyo halka la aado. Waxay sidoo kale maareynayaa safafka si ay u siiso cod bixiyaasha nifaas weyn.



4 Codey doorashada guud


Doorashada guud, waxaad heleysaa labo codeyn — codeynta xisbiga iyo codeynta musharaxa.

Codeyntaada xisbiga

Codeynta xisbiga ayaa sida weyn go'aansado tirada guud ee kuraasta ee xisbi walboo siyaasadeed ka helo Baarlamaanka. Xisbiyada leh saamiga weyn ee codeynta xisbiga wuxuu helayaa kuraasta Baarlamaanka.

Waa inaad ka doorataa isla liiska ee xisbiyada siyaasadeed haddii aad ku jirtid doorashada guud ama codeynta Māori.

Warqadaada codeynta, fadlan ku sax magaca xisbiga siyaasada ee dooqaaga ah.





Codeyntaada musharaxa

Codeyntaada doorashada waxaa loogu talloagalay doorashada musharaxa aad jeclaan laheyd inuu ku jiro xubinta Baarlamaanka (MP) oo degmada aad ku nooshahay. Musharaxa leh inta badan codeynta codbixintaada ayaa noqdo MP-gaaga codbixinta.

Haddii aad ku jirtid liiska Māori, waxaad u codeyneysaa musharaxa u taagan doorashada Māori. Haddii aad ku jirtid liiska doorashada guud, waxaad u codeyneysaa musharaxa u taagan doorashada guud.

Warqadaada codeynta, saar saxitaanka oo magaca musharaxa ee inta badan aad jeclaan laheyd inuu kugu matalo degmada deegaanka.



Qeybtaan ee codeynada xisbiga = Isla qeybta kuraasta ee Baarlamaanka

5 Codeynta aftiyada

Warqadaada cod bixinta ee loogu talloagalay aftiyada, ku codey adiga oo ka jawaabayo su'aalaha aftida. Saar saxid oo u dhow 'Yes' (Haa) ama 'No' (Maya).

Codeynta aftiyada waa iqtiyaar. Waxaad sidoo kale xulan kartaa inaad codeysid kaliya hal afti haddii aad rabtid.



6 Geli waraaqahaaga codeynta sanduuqyada cod bixinta ee lagu siiyay

7 Isticmaal jermisdilaha ka hor inta aadan ka tagin

Intaad sii baxaysid, isticmaal jeermisdilaha gacmaha ee lagu siiyay. Iyo waa intaas kaliya — codeynta way dhammaatay!



Ma tagi karo goobta codeynta?

Haddii tagitaanka goobta codeynta kugu adagtahay ama aysan suurtoogaleynin, dhoor dooqyo waa la heli karaa si loo hubiyo inaad weli codeyn kartid.

Haddii aad ku jirtid guriga daryeelka oo aysan kuu suurtoogaleyn inaad aadid goobta codeynta, Sarkaalka Deegaankaaga ee soo Laabanayo ayaa la soo xiriirayo maareeyaha gurigaaga daryeelka si u diyaariyo adeegyadaada codeynta.

Haddii aadan tagi karin goob codeyn sababtoo ah waxaad ku jirtaa isbitaalka, ka bilow 3 da Oktoobar, saaxib ama xubin qoyska ah ayaa kuu keeni karo waraaqahaaga codeynta.

Haddii aadan tagi karin goobta codeynta sababtoo ah caafimaad iyo dhaqaaq liito waxaad heli kartaa caawinta aad ku codeysid. Ka ogow wax badan [vote.nz](https://www.vote.nz) ama soo wac **0800 36 76 56** si aad uga hadashid dooqyadaada.

Ka codeynta dibada

Waxaad iska diiwaangelin kartaa oo aad ka codeyn kartaa dibada ka bilow Arbacada 30 ka Sebteembar illaa 7.00pm, Sabtida 17 ka Oktoobar (waqtiga NZ).

Qaabka ugu fudud oo ugu degdegsan ee looga codeeyo dibada waa dajisashada iyo daabacida waraaqaha codeynta oo doorashada guud iyo aftiyada halkaan [vote.nz](https://www.vote.nz)

Waxaa sidoo kale kuu suurtoogaleysa inaad ka codeysid goobta codeynta dibada, ama weydii waraaqaha codeynta boostada si laguugu soo diro dibada. Dooqyadaan waxay ku xirnaan karaan xaalada COVID-19 ee aagaaga. Ka fiiri [vote.nz](https://www.vote.nz) warbixinta ugu dambeysa ee ku saabsan ka codeynta dibada.

Haddii aad u baahantahay caawinta looga codeynayo dibada, fadlan inaga nala soo xiriir.

Taleefonka ka imaanayo dibada: +64 9 909 4182 (qiimooyinka dibada ayaa quseyn karto)

Taleefonka ka imaanayo New Zealand: 0800 36 76 56

Ma u baahantahay caawin lagu aqriyo ama lagu calaameeyo waraaqahaaga codeynta?

Saaxib, xubin qoyska ah ama sarkaalka doorashada ayaa kugu caawinayo aqrinta ama calaameynta waraaqahaaga codeynta. Qofkaas wuxuu:

- kula aadi karaa gadaasha shaashada codeynta
- kuu aqrin karaa erayada iyo warbixinta ku yaalo waraaqaha codeynta
- kuu calaameeyo waraaqaha codeynta haddii aad weydiisatid.

Kuuma sheegi karaan cida ah inaad u codeysid doorashada guud, ama sida ah inaad u codeysid aftiyada.

Haddii aad camoole tahay, qeyb ahaan camoola ah ama qabtid curyaanimada jirka taasi waxay la micna tahay inaad calaameyn karin waraaqahaaga codeynta caawin la'aan, waxaad ku codeyn kartaa adiga oo isticmaalayo adeega hingaada taleefonka.

Waxaad u baahantahay inaad iska diiwaangelisid isticmaalida adeegaan. Soo wac **0800 028 028** oo xulo dooqa 1 si aad isu diiwaangelisid.

Waxaad is diiwaangelin kartaa ka bilow Isniinta 14 ka Sebteembar illaa 7:00pm Qamiista 15 ka Oktoobar.

Booqo [vote.nz](https://www.vote.nz) si aad wax badan uga ogaatid adeegaan.